



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

### **WARSAXAAFADEED 06/2011**

#### **Kulanka Wadatashiga ee Heerkiisu Sareeyo waxaa si aad ah uga faa'ideysan doona dadka Soomaaliyeed**

Nayroobi, 07 Abriil 2011 – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay, Danjire Augustine P. Mahiga ayaa maanta sheegay in kulanka wadatashiga ee heerkiisu sareeyo uu sidii loogu talagalay uga dhici doono magaalada Nayroobi 12ka iyo 13ka bishan Abriil.

“Waxaa dhinacyada Soomaaliyeed iyo mas’uuliyiintoodaba naga soo gaaray jawaabo wax ku ool oo ay ku taagerayaan kulanka wadatashiga ee heerkiisu sareeyo kuwaasoo dhammaantooda doonaya habkii lagu xoojin lahaa wadhadallada dhexmaraya Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah iyo dhinacayada kale ee ay jaalka yihiin ee ay arrintu khuseyso.”

Danjire Mahiga wuxuu sheegay inay jiraan kooxo yar oo diidan qabashada kulan iyagoon si dhab ah u fahmin ujeeddada runta ah ee kulanka, taasoo dhalisay isfaham la’aanta la xiriirta qabashada kulanka.

“Waxaan rumeysanahay in dadka qaarkood si xun loogu sheegay ujeeddada kulanka. Qaramada Midoobay waxay cayaartaa kaalin ay ku fududeynayso caqabadaha. Dhowaan arrimihii ka dhex dhacay hay’adaha federaalka ku meelgaarka waxay muujiyeen inay caqabad ku timid wadhadalkii u dhexeeyay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah iyo dhinacyada kale ee ay jaalka yihiin. Haddaba, sida uu qabo Heshiiskii Jabuuti, kaalintaygu waa inaan u fududeeyo hay’adaha federaalka ah habkii ay uga heshiin lahaayeen farqiga u dhexeeya sidii hore loogu marin lahaa geeddi socodka nabadda. Kulanku wuxuu si xoog leh diiradda u saarayaa arrimaha iyo hawlaha kale ee loo baahanyahay si hawlaha kalaguurka ah loogu soo gebagebeeyo si waafaqsan danta dadka Soomaaliyeed. Natijada kulanka ka soo baxaysa waa inay noqontaa arrimaha muhimka ah ee la doonayo in la qabto si geeddi socodka nabadda loo hormariyo hawlaha xilliga kalaguurkana loo dhammeeyo,” ayuu yiri Danjire Mahiga.

Danjire Mahiga wuxuu kaloo sheegay in kulankani uu gogolxaadh u yahay kulan kale oo dabagal ah oo ka dhici doona magaalada Muqdishu, sida ay soo jeedisay Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xafiiska Qaramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

Danjire Mahiga wuxuu yiri Qaramada Midoobay oo haysata taageerada Bulshada Caalamka waxay diyaar u tahay inay fududeyso qabashada kulankan wadatashiga si loo taageero Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah iyo dadka Soomaaliyeedba. Hase ahaatee, inuu shirku noqdo mid miro dhal ah waxay u taallaa ka qaybgalayaasha.

“Qaramada Midoobay waxay fududeyn doontaa qabashada kulanka, bulshada caalamkuna waxay dhegeysan doontaa fikradaha ka soo qaybgalayaasha. Hase ahaatee, annagu kulanka waxaan u imanaynaa goobjoog ahaan ama farriin gudbiyeyaal ama inaan ka jawaabno wixii su’aalo ah. Maadaama uu kulanku yahay mid wadatashi ah wax go’aan ah lagu ma gaarayo kulanka.

Kulankan waxaa loogu talagalay dadka Soomaaliyeed inay dhexdooda kaga doodaan wixii la qaban lahaa marxaladda soo socota. Dadka Soomaaliyeed ayaa si aad ah uga faa’ideysan doona kulankan.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel: +254 20 762 6805 / 6869 ama +254 733902020 ama 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):

[www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)